

Aqoonsiga
Codeeyaha -
Hagahaaga



Wax walba oo aad u baahan tahay inaad ka
ogaatid aqoonsiga sawirka ee doorashooyinka
deegaanka Ingriiska ee Maajo 2023


The Electoral Commission

**Khamiista 4-ta Maajo 2023,
doorashooyinka deegaanka ayaa ka
dhacaayo Ingiriiska oo dhan.**

Doorashooyinkaan, waxaad u baahan doontaa inaad la imaatiid aqoonsiga sawirka si ay kuugu suurtogasho inaad ka codeyso goobta codbixinta.

Buug-yaraahaan wuxuu sharaxi doonaa foomamkee ah aqoonsiga sawirka aad u isticmaali karto si aad u codeyso. Waxuu sidoo kale sharxayaa sida loo codsado dokumiintiga aqoonsiga codeeyaha oo bilaashka ah, ee loo yaqaan Shahaadada Maamulka Codeeyaha, haddii aad mid u baahan tahay.

Sidee iskaga
diiwaangeliyaa si
aan u codeeyo?




Si aad u codeeyo doorashooyinka, waa inaad ka
diiwaangashanaataa si aad u codeyo **11.59pm xiliga**
Isniinta 17 Abril 2023.

Haddii aadan abid is diiwaangelin, oo aad dhawaan u guurtay ciwaan kale, ama aad badeshay magacaaga, iska diiwaangeli si aad ugu codeyso onleenka ee **www.gov.uk/register-to-vote**. Sidoo kale waxaad ku codsan kartaa adoo buuxinaayo foomka arjiga warqada ah.

Haddii aad uga baahan tahay caawin is diiwaangelinta si aad u codeyso, ama aad rabto inaad cadsato foomka arjiga, la soo xiriir gollaha deegaankaaga.

Si aad u heshid faahfaahinta xiriirka ee gollaha deegaankaaga booqo **electoralcommission.org.uk/voter** ama soo wac qadkeena caawinta **0800 328 0280**.

Doorashooyinkee ayaan codeynayaa?

Doorashooyinka deegaanka waxay ka dhacayaan 230 golayaal oo dhan ee ku yaalo Ingiriiska xiliga **Khamiista 4-ta Maajo 2023**, oo ay ku jiraan doorashooyinka golaha deegaanka, duqa magaalada iyo maamulka kaniisada.



Si aad u ogaatid haddii ay jiraan
doorashooyin ka dhacaayo aagaaga booqo
electoralcommission.org.uk/voterID




Ama soo wac qadkeena
caawinta **0800 328 0280**.

Foomamkee Aqoonsiga ayaan u isticmaali karaa si aan u codeeyo?

Waxaad u baahan doontaa oo kaliya inaad muujiso hal nooc oo aqoonsiga sawirka ah, laakiin waxay u baahan tahay inay noqoto nooca asalka ahaa ee ma aha sawirka nuqulka ah.

Waxaad isticmaali kartaa mid ka mid ah foomamka soo socda ee aqoonsiga sawirka si ay kuugu suurtogasho inaad ka codeyso goobta codeynta.

 <p>Safarka caalamiga ah Baasaboor</p>	 <p>Safarka deegaanka Kaararka safarka qaar ee qiimaha jaban</p>
 <p>Darawalnimada iyo baakinka</p> <ul style="list-style-type: none"> • Shatiga darawalnimada (oo ay ku jiraan shatiga ku meelgaarka ah) • Baajka baluuga ah 	 <p>Dokumintiyada kale ee ay soo saareen dowlada</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dokumentiga socdaalka faraha • Kaarka Aqoonsiga Difaaca • Kaararka Aqoonsiga Qaranka
 <p>Cadeynta da'da Kaarka aqoonsiga oo wato calaamada BAASITAANKA (Cadeynta Qorshaha Heerarka Da'da)</p>	

Haddii aad haysatid nooca aqoonsiga sawirka ah oo la aqbali karo oo aanan dhacsaneyn, weli waad isticmaali kartaa inaad ku codeyso goobta codbixinta haddii uu weli adiga kuu egyahay.

Haddi aadan horaan u laheyn nooca aqoonsiga la aqbali karo ama aadan hubin haddii aqoonsiga sawirkaaga weli adiga kuu egyahay, waxaad codsan kartaa dukumeenti aqoonsiga codeeyaha oo bilaashka ah, ee loo yaqaan Shahaadada Maamulka Codeeyaha.

Waxaad u baahan tahay inaad diiwaangashanaatid si aad u codeyso ka hor intaadan codsan Shahaadada Maamulka Codeeyaha. Markii aad is diiwaangelisid si aad u codeyso, waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad leedahay aqoonsiga sawirka ama haddii aad rabto inaad codsatid Shahaadada Maamulka Codeeyaha.



Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan foomamka aqoonsiga ee la aqbali doono boooqo electoralcommission.org.uk/voterID



Ama soo wac qadkeena caawinta **0800 328 0280**.

Codsashada Shahaadada Maamulka Codeeyaha



Waqtiga ugu dambeeyo ee la codsanaayo Shahaadada Maamulka Codeeyaha oo isticmaalka doorashada waa **5pm ee Tallaadada 25 Abril**, laakin waa inaad u codsataa sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtogalka ah haddii lacala gollaha deegaankaaga u baahan yihiin inay hubiyaan faahfaahin walba ee adiga ah.



Waxaad ka codsan kartaa Shahaadada Maamulka Codeeyaha onleenka ee **voter-authority-certificate.service.gov.uk**

Waxaad sidoo kale ku codsan kartaa adoo buuxinaayo foomka arjiga warqada oo ku soo diraayaan midaan gollaha deegaankaaga. Waxaa sidoo kale kuu awoodi kartaa inaad qof ahaan uga codsato xafiiska gollaha deegaankaaga.

Haddii aad uga baahato wax caawin ah codsashada Shahaadada Maamulka Codeeyaha ama aad rabto inaad codsato foomka arjiga, la soo xiriir gollaha deegaankaaga. Si aad u heshid faahfaahinta xiriirkooda boqo **electoralcommission.org.uk/voter** ama soo wac qadkeena caawinta **0800 328 0280**.

Macluumaadkee ayaan u baahanahay inaan bixiyo markii aan codsanaayo Shahaadada Maamulka Codeeyaha?

Markii aad codsaneysid Shahaadada Maamulka Codeeyaha, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso

- **Magacaaga**
- **Taariiqda dhalashadaada**
- **Ciwaankaaga**
- **Lambarkaaga Caymiska Qaranka**

Haddii aadan garaneyn lambarkaag Caymiska Qaranka, ama aadan mid laheyn, weli waad codsan kartaa. Gollahaaga ayaa kula soo xiriiraayo si aad u codsato cadeyn kale oo aqoonsigaaga ah.

Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad la gudbisid sawir arjigaaga. Sharuudaha sawirka wuxuu la mid yahay sharuudaha sawirka baasaboorka.



Wax badan ka ogow oo ku saabsan sharuudaha ee electoralcommission.org.uk/voterID



Ama soo wac qadkeena caawinta **0800 328 0280**.

Maxaa ka dhaci doona goobta codbixinta?

Markii aad timaatid goobta codbixinta, xubinta shaqaalaha wuxuu:

1. Ku weydiin doonaa magacaaga iyo ciwaankaaga si markaas ay kaaga helaan diiwaanka doorashada
2. Weydii aqoonsiga sawirkaaga oo hubi haddii la aqbali karo
3. Haddii aqoonsigaaga la aqbali karo, waxay ku siin doonaan warqadaada codbixinta oo kugu hagayaan inaad ku buuxiso sanduuqa codbixinta sida caadiga ah.

Aaga gaarka ah ayaa laga heli doonaa goobta codbixinta, marka waxaad dooran kartaa in laguu eego aqoonsigaaga sawirka si gaar ah haddii aad rabto. Tani waxay noqon kartaa qol gaar ah, ama aag ka soocan shaashad gaarka ah, waxay ku xirantahay goobta codbixinta

Shaqaalaha goobta codbixinta ayaa halkaas u joogaan inay ku caawiyaan. Haddii aad u baahan tahay caawinaad waqtii kasta, weydiiso kaliya.

Codeynta boosto ahaanta ah

Uma baahnid inaad bixisid aqoonsiga sawirka si aad ugu codeyso boosto ahaan.

Miyay jiraan
qaabab kale oo
lagu codeeyo?



Si aad u codsato inaad ku codeyso boosto ahaan, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka arjiga codeynta boostada oo aad hubisid inay ugu timaado gollaha deegaankaaga **5pm xiliga Tallaadada 18 Abril 2023**.

Waxaad ka heleysaa warqadaada codbixinta boostada. Buuxi oo soo celi warqadaada codeynta, adiga oo hubinaayo inaad u reebto waqtii ku fillan oo ay ku timaado gollahaaga deegaanka xiliga **10pm ee Khamiista 4-ta Maajo**. Haddii aadan ku dhejin karin baakida codbixinta boostadaada wakhtigeeda, waxaad u qaadan kartaa goobta codbixinta ama xafiiska golaha deegaankaaga maalinta cod bixinta.

Ku codeynta wakiil

(ogolaanshaha qof aad ku kalsoon tahay inuu ku codeeyo matalaadaada)




Si aad u codsato inaad ku codeyso wakiil, buuxi foomka codsiga oo ku soo dir golaha deegaankaaga si uu kuugu yimaado **5pm Tallaadada 25 Abril 2023**.

Qofka aad dooratid inuu ku codeeyo matalaadaada wuxuu u baahan doonaa inuu aado goobtaada codbixinta si uga codeeyo oo wuxuu u baahan doonaa inuu tusiyo aqoonsiga sawirkooda si ay ugu suurtogasho inuu dhiibbo codkaaga. Uma baahnaan doonaan inaad tuisid Aqoonsigaaga markii aad ku codeyneso matalaadaada.

Xaalad degdeg ah meeshaas oo aadan u aadi karin goobta codbixinta qof ahaan, waad codsan kartaa wakiilkka degdega ah illaa iyo **5pm ee Khamiista 4-ta Maajo**.

Wixii warbixin dheeraad ah ama si aad u heshid foomka arjiga boostada ama wakiilkka, booqo **electoralcommission.org.uk/voter** ama soo wac qadka caawinta **0800 328 0280**.



Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad jeelaan laheyd inaad maclumaaadkaan ku heshid qaab la heli karo, booqo **electoralcommission.org.uk/voterID**, soo wac qadka caawinta **0800 328 0280** ama sawir koodhka QR-ka ee hoose.



Buug-yarahaan waxaa soo saaray Guddiga Doorashada.

Guddiga Doorashada waa hay'ad madaxbanaan ee kormeerta doorashooyinka isla markaana maamusha dhaqaalaha siyaasadda ee UK. Wuxaan ka shaqeeynaa inaan sare u qaadno kalsoonida shacabka ee nidaamka dimoqraadiyada iyo xaqijintaa daacadnimadooda.

Nagala soco



@ElectoralCommUK



facebook.com/ElectoralCommissionUK



@ElectoralCommissionUK

- Miyaan is diiwaangeliyay inaan codeeyo?
- Miyaan haystaa sawirka Aqoonsiga?
- Miyaan helay Aqoonsiga sawirka ee aan geeyo goobta codbixinta?
- Haddii aysan aheyn, miyaan cadsaday aqoonsiga codeeyaha bilaashka ah?
- Miyaan codeeyay?

Waqtiga ugu dambeeyo ee la iska diiwaangelinaayo si aad u codeyso doorashooyinka deegaanka 2023 waa **11.59pm xiliga Isninta 17 Abriil.**

Waqtiga ugu dambeeyo ee la cadsanaayo Shahaadada Maamulka Codeeyaha ee doorashooyinka deegaanka 2023 waa **5pm ee Tallaadada 25 Abriil.**

Booqo **electoralcommission.org.uk/voterID** ama soo wac **0800 328 0280** wixii maclumaaad dheeraad ah ee:

- Isdiiwaangelinta si loo codeeyo
- Aqoonsigee ayaa la aqbalayaa markii la codeynaayo
- Sida loo cadsado Aqoonsiga codeeyaha bilaashka ah